


# Cilmi Baarista JLARC ee khuseeyo DDA

## Nala qaybso waxaad kala kulantay markaad codsanayso adeegyada laxaad la’aanta koboceed

Waxaanu dib u eegeynaa habka ay DDA:

- U go’aamiso u qalmitaanka.
- U qiimeyso baahiyaalka adeegeed.
- U xaqiijiso inay dadka heleyaan adeegyada ay u baahan yihiin.

Waxaanu dooneynaa inaanu ogaano in habraacyada yihiin kuwo dadka u fudud iyo inay jiraan wax la wanaajin karo.

Macaamiisha DDA, qoysaskooda, iyo dadka matalo oo noo sheego waxay kala kulmeen waxay naga caawin kartaa inaanu wanaajino habka ay DDA adeegyada u bixiso.

## Maan ka qayb qaadan karaa?

Macaamiisha DDA ee dadka wayn iyo qoysaskooda mise dadka matalaayo ayaa si ikhitiyaarkooda uga qayb qaadan karaan iyagoo riixaayo halkan:

https://umn.qualtrics.com/jfe/form/SV_0ILTCNiPleKM0B0

mise soo wacaayo: (888) 240-8636

## Su’aalo ayaan qabaa. Yaanu kala xiriiraa?

**Matt Roberts iyo Emily Unholz-Bowden**: WADDAEVAL@umn.edu

**Telefoonka:** (888) 240-8636

## Maxaa dhacaayaa

### JLARC ayaa dib u qiimeyneysaa habka Maamulka Naafonimada Koritaanka (Developmental Disabilities Administration, DDA) ay ugu adeegto macaamiisheeda

Barlamaanka ayaa amray Joint Legislative Audit and Review Committee (Guddiga Barlamaanka ee Hubinta iyo Qiimeynta) (JLARC) inuu qiimeeyo Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA). Wax badan ka baro qiimeynta JLARC (https://leg.wa.gov/jlarc/reports/PSQ/DDA_PSQ.pdf).

### Jaamacadda Minnesota (UMN) ayaa inaga caawinayso inaanu helno ra’yiga macaamiisha DDA, qoysaskooda, iyo dadka matalaayo

Machadka Dhexgalka Bulshadda ee UMN ayaa cilmi baaris ku samayn doonto dadka doorto. Cilmi baarista waxay leedahay saddex qayb oo gaaban oo dadka doorto ay ku buuxin doonaan dhawr isbuuc gudahooda. Shaqaalaha UMN ayaa sidoo kale wareysi shakhsiyeed la yeelan doonaa qaar ka mid ah dadkaasi iyo wareysi kooxo yar dhexdooda. Waxbadan kasii baro Machadka (https://ici.umn.edu/welcome/overview).

#### Maclumaadkaada waan ilaalin doonnaa

- Kuma isticmaali doono warbixinadeena magacyadaada mise maclumaad kale ee shakhsigaada lagu aqoonsan karo.
- Jawaabtaada shakhsi lama qaybsan doonnoo DDA.
- Ka qayb qaadashadaada saamayn kuma yeelan doonto u qalmitaankaada mise adeegyada ad hesho.
- Jaamacadda Minnesota maclumaadka ay kasoo uruuriso macaamisha iyo qoysaskooda/dadka matalaayo uma isticmaali doonto cilmi baaris kale.

# Wax Dheeraad ah Baro

## 1. JLARC Yaa Waaye?

Joint Legislative Audit and Review Committee (Guddiga Barlamaanka ee Hubinta iyo Qiimeynta) (JLARC) waa guddi ka tirsan Maamulka Gobolka Washington iyo Guriga Sare ee ka kooban xildhiibaano kasoo jeedo republican iyo democrat. Shaqaale guddi ee ka tirsaneyn xisbi waxay u qabataa Barlamaanka Gobolka Washington xisaab hubinno iyo qiimeynta barnaamij. Maclumaad dheeraad oo ku saabsan xafiiska ayaa laga heli karaa bogga "About us" ee boggeena internet (https://leg.wa.gov/jlarc/Pages/aboutjlarc.aspx).

## 2. Waxaan door bidayaa inaanu ra'yigayga uga dhiibto xagga telefoon. Maan samayn karaa taas?

Haa. Fadlan kala xiriir shaqaalaha Jaamacadda Minnesota telefoonkan (888) 240-8636.

## 3. Ma heli kari kombyuutar. Miyaanu weli ka qayb qaadan karaa?

Haddaad heli karin kombyuutar mise telefoonka smartphone, wali waxaad ka qayb gali kartaa mashruuca. Waxaad ka bilaabi kartaa inaad kala xiriirto shaqaalaha Jaamacadda Minnesota telefoonkan (888) 240-8636.

## 4. Ma jiraan adeegyo turjumidda luuqadeed?

- Haa. Foomka iska diiwan gelinta waxaa lagu heli karaa dhawr luuqadood sida: Afcarabi, Jaynis, Ingiriis, Khmer (Afka Cambodia), Korean, Afhindi, Russian, Isbaanish, Afsoomaali, Tagalog, Ukrainian, iyo Vietnamese. Luuqado dheeraad ayaa lagu dari karaa. Haddii aad leedahay su'aalo mise aad dooneyso inaad codsato luuqad kale, fadlan soo wac (888) 240-8636.
- Cilmi baarista waxaad ku heli kartaa luuqadda aad jeceshahay.
- Turjubaaneyaal ayaa lagu heli doonaa wareysiyaalka iyo wada hadalada kooxaha.

## 5. Yaa ka qayb qaadan karaa? Miyuu xubin qoyskeeda ka mid ah mise qof imatalaayo magacayga oga jawaabi karaa su'aalaha?

- Waad ka qayb qaadan kartaa haddaad tahay mid ka mid ah dadka xiga:
    - Macaamilka DDA oo da'diisu tahay 19 sano mise ka wayn ee awoodo inuu si madax bannaan oga jawaabo su'aalaha mise isagoo caawin ka helaayo qof kale.
    - Xubin qoyska/qof matalaayo ilmo mise qof wayn oo ka diiwan geshan adeegyada DDA.
    - Haddii adiga mise qofkaad matalayso uu codsaday DDA laakin laguu go'aamiyay inaad u qalmin.
- Dad si walba isugu jiro macaamiisha DDA iyo xubnaha qoyskaada /dadka matalaayo ayaa ka qayb qaadan karaan (macaamilka keligii, xubin qoyska/qof matalaayo keli, mise labadaba). Cilmi baarista ayaa lagaa weydiin doonaa inaad sheegto inaa tahay macaamil DDA mise xubin qoys/qof matalo.

## 6. Ma qasab baa inaan ka qayb galo?

Maya. Ka qayb qaadashada waa ikhtiyaari.

## 7. Sideen u isticmaali doontiin jawaabtayda?

- Waxaan isugeyn doonnaa jawaabtaada jawaabta macaamiisha kale iyo qoysaskooda/dadka matalaayo. Waxaanu isticmaali doonnaa maclumaadka isujiro sifo aan ugu qiimeyno geedi socodyada DDA ee go'aaminta u qalmitaanka, qiimeynta baahiyaalka, iyo xaqiijinta in macaamiisha ay helaan adeegyada. Waxaanu dooneynaa inaanu ka caawino DDA inay wanaajiso geedi socodyada iyo adeegyada gobolka. Haddaan halkaa ka dhex helno arrimo mise walaacyo la wada qabo, waxaanu ku dari doonaa warbixinteena buuxdo ee Barlamaanka.
- DDA ma heli doonto ra'yi celin fiican mise xun ee khaas u ah maamuleyaal kiis shakhsiyeed mise xafiisyo.

## 8. Sidey JLARC iyo Jaamacadda Minnesota u ilaalin doontaa maclumaadkayga shakhsi?

- Dhammaan maclumaadka shakhsi ahaan laguugu aqoonsan karo oo aad nala qaybsato waa la qarin doonaa waxaana keli ah logu isticmaali doonaa mashruucan. Laguma weydiin doonoo maclumaad walbo oo lacageed.
- Ma jiro qof ka baxsan JLARC iyo shaqaalaha Jaamacadda Minnesota oo heli kari doono jawaabtaada shakhsiyeed.

## 9. Maxaan u baahanahay inaanu sameeyo haddaan is diiwan geliyo?

- Qof walba oo isdiiwan geliyo waxaa la weydiin doonaa inuu sameeyo cilmi baaris ka kooban 3 qaybood ilaa dhawr isbuuc dhexdooda. Cilmi baarista ayaa wax kaa weydiin doonto waxaad kala kulantay geedi socodka DDA ee u qalmitaanka iyo qiimeynta iyo wax caqabo aad kala kulantay helitaanka adeegyada. Qayb walbo ee cilmi baarista way gaaban tahay mana kuugu qaadan doonto muddo ka badan 10 ilaa 15 daqiiqadood sifo aad u dhammaystirto.
- Markaad isdiiwan geliso, waxaa lagu weydiin doonaa inaad buuxiso saddexda cilmi baarista gaaban tan ugu horeysa. Jaamacadda Minnesota ayaa kulasoo xiriiri doonto markay tahay xiliga buuxinta labada cilmi baaris ee xiga.
- Dad qaar waxaa wareysi la yeelan doono shaqaalaha Jaamacadda Minnesota. Wareysiyada waxay u ogolaan doonaan inay si kasii wacan u fahmaan waxyaabaha ay macaamiisha la kulmeen markay ku dhex jireen geedi socodka u qalmitaanka DDA iyo helitaanka adeegyada.

- Dad qaar ayaa ka qayb qaadan doono wada hadalada kooxaha yar. Wada hadaladan ayaa kuu ogolaan doono adiga iyo macaamiisha kale ee DDA iyo qoysaska/dadka matalaayo inaad ka wada hadashiin caqabadaha helitaanka adeegyada kuwee ugu muhiimsan in wax laga qabto iyo sida loo wanaajiyo geedi socodyada iyo habraacyada DDA. Qaar ka mid ah wada hadaladan waxaa loo samayn doonaa si shakhsi kuwo kale na waxaa lagu qaban doonaa hab shirka fiidiyaha.

### 10. Miyaan ka qayb qaadan karaa hal qayb keli mise waxaan ku qasbanahay inaanu ka qayb qaato saddexdaba?

Macaamiisha DDA clients iyo xubnha qoyskooda /dadka matalaayo ayaa ka qayb qaadan karaa mid ka mid ah mise ka badan marxaladaha masharuuca. Ka qayb qaadashada marxalad walba waa mid si buuxdo ikhtiyaari u ah kumana qasbanid inaad ballan ku gasho ka qayb qaadashada marxaladaha xiga ee mashruuca.

### 11. Intee lagu heli iyo goormaa la heli doonaa natiijada?

Warbixinta ayaa lagu daabici doonaa bogga internetka JLARC gabagabada bisha Nofeembar ee 2024. Shaqaalaha JLARC ayaa u bandhigi doonaan xubnaha JLARC natiijooyinka ugu muhiimsan taarikhda Diseembar 4, 2024 (taarikhda ayaa la beddeli karaa). Ka dib markii lasoo afjaro mashruuca, shaqaalaha Jaamacadda Minnesota ayaa abaabuli doonaan qaab fudud ee soo koobayso natiijooyinka iyo talooyinka lasoo jeediyay.